

## Muhiimad siinta badqabka shaqaalaha ku shaqeeya wadada dhinacyadeeda

Agoosto 08, 2023

Dawlada Alberta waxay xoojinaysaa qawaaniinta si ay u ilaaliyaan dhammaan shaqaalaha ku shaqeeya wadada dhinacyadeeda.

Ilaalinta badqabka dadka reer Alberta - shaqaalaha iyo darawallada - wadada jooga ayaa ah muhiim. Alberta ayaa ah mid kamid ah labada gobol ee keliya ee aan lahayn sharciga ka leexashada shaqaalaha wadada, laakiin dawlada Alberta ayaa badeshay taas.

Si loo kordhiyo badqabka shaqaalaha ku shaqeeya wadada dhinacyadeeda, laga bilaabo Sibtambar 1, darawallada ku wada gawaadhida haadka ugu dhow halka uu taagan yahay gaadhiga ku shaqaynaya wadada dhinacyadeeda nalalka falaashkuna u shidan yihii waa inuu xawaarihiisa u soo dimaa 60 km/h ama xadiga xawaaraha meesha ku qoran, hadba kii hoose. Darawalladu waa inay sidoo kale u leexdaan haadka kale ee ka fog haddii ay ammaan tahay uuna qaado talaabooyin macquul ah si uu ugu oggolaado darawallada kalena inay haadadka kasii shisheeya usii wareegaan.

Wakhtigan, keliya darawallada gaadiidka xamuulka ah iyo shaqaalaha gurmadka degdega ah ayaa lagu hela tixgelin ilaalo oo gaar ah sida uu dhigayo *Sharciga Nabdgalyada Wadooyinka*, laakiin hadda dhammaan shaqaalaha ku shaqeeya wadada dhinacyadeeda ee taagan geeska wadada, oo shidayna nalalka digniinta, ayaa tixgalintan ilaalo ee gaarka ah lagu darayaa.

Xeerarka cusub ee badqabka shaqaalaha ku shaqeeya wadada dhinacyadeeda ayaa lagu dabbaqi doonaa dhammaan shaqaalahaku shaqeeya wadada dhinacyadeeda, ayna ka mid yihii shaqaalaha gurmadka degdega ah, darawallada gaadiidka isxanbaarka, shaqaalaha dayactirka wadooyinka waawayn iyo shaqaalaha barafka xaaqa.

Tartiib u socoshada iyo ka leexashada dhammaan shaqaalaha ku shaqeeya wadada dhinacyadeeda ayaa sugaysa badqabka qof kasta waxayna xaqijinaysaa in gaadiidku si ammaan ah u kala socdo. Si ay gacan uga gaystaan dhaqan gelinta isbadeladaan, ganaaxyo lacageed iyo ciqaabo ayaa lagu soo rogi doonaa falalka badqab darada ah marka la dhaafaayo shaqaalaha ku shaqeeya wadada dhinacyadeeda iyo kuwa barafka xaaqa.

## Xaqiiqooyin kooban

- Sida Uu Sheegay Guddiga Magdhawga Shaqaalahaa ee Alberta (WCB), waxaa jiray 2,229 oo dhaawac oo uu keenay gaadhi jiidhay shaqaale intii u dhexaysay 2014 iyo 2018.
- Intii u dhexaysay Maarsa 2018 iyo Maarsa 2021, waxaa jiray ku dhawaad 130 shil oo la xiriiray shaqaalahaa barafka xaaqa oo u shaqeeyaa Waaxda Gaadiidka iyo Marinnada Dhaqaalahaa.
- Intii lagu jiray xilliga qaboobaha ee 2022-23, waxaa jiray 37 shilal gaadiidka ah oo la xiriiray qalabka barafka xaaqa ee dawlada.
- Uhoggaansamid la'aanta xeerarkan ayaa keeni karta ganaax iyo dhibco saddex ah oo lagaa jaro:
  - \$243 iyo sadex dhibcood oo lagaa goynayo oo ganaax ah ayaa lagu muteysanayaa ku fashilmida dhimista xawaaraha oo loosoo yaraynayo xadiga ugu badan ee deggan marka la dhaafaayo shaqaalahaa ku shaqeeyaa wadada dhinacyadeeda oo taagan.
  - \$243 ganaax lacageed ah iyo sadex dhibcood oo ganaax ah oo lagaa goynayo ayaa lagu muteysanayaa haddii aan loo oggolaan darawallada kale inay uwareegtaan haadka ka shisheeyaa halka uu taagan yahay gaariga xaalada gurmadka ah, gaariga isxanbaarka ama gaariga shaqada wadada dhinaceeda ka wada.
  - Ganaax dhan \$324 iyo sadex dhibcood oo ganaax ah oo lagaa goynayo ayaa lagu muteysanayaa waydaarashada aan amaanka ahayn ee qalabka barafka xaaqa.

## Xogta la xiriira

- [Badqabka shaqaalahaa ku shaqeeyaa wadada dhinacyadeeda](#)

## Wararka la xiriira

- [Dhaqan gelinta badqabka shaqaalahaa ku shaqeeyaa wadada dhinacyadeeda](#) (Maarsa 1, 2023)
- [Kor u qaadista badqaba shaqaalahaa ku shaqeeyaa wadada dhinacyadeeda](#) (Maarsa 16, 2022)

## Warbaahinta kala duwan

- [Daawo shirka jaraa'id](#)